SSPF – Is-kaashiga Dugsiga, Adeegga Arrimaha Bulshada, Booliska iyo Waxqabadyada Xilliyada Firaaqada

Ma ka walwalsan tahay da'yar kugu dhow? Waxay noqon kartaa ka maqnaanshaha iskuulka ama khataro la xiriira dembiyada ama daroogo. Dugsiga, Adeegga Arrimaha Bulshada, booliska iyo waxqabadyada Xilliyada Firaaqada ee degmada Vänersborg waxa ay iska kaashadaan in ay taageero siiyaan qoysaska leh dhallinyaro ay da'doodu u dhexeyso 12 ilaa 16 sano.

Oggolaanshahaaga ayaa loo baahan yahay si aan u wada shaqayn karno

Si' wada shaqeynta SSPF u shaqeyso, adiga ka waalid ahaan ama mas'uul ahaan waa inaad oggolaataa in sir-xejinta dadka waaweyn ka dhaxeyso la jebiyo. Taas oo micnaheedu tahay in tusaale ahaan Dugsiga iyo Adeegga Arrimaha Bulshada ay ka wada hadli karaan xogta lagama maarmaanka ah ee muhiimka u ah adiga iyo da'yarkaaga.

Sidaan bay u shaqeysaa

SSPF-ga, waxaan doonaynaa inaan si wadajir ah ula fal-galno da'yarkaaga goor hore. Badanaa waalidiinta ama dadka waaweyn ee ku dhow da'yarka ayaa dareema walwal. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa in da'yarku:

- Beddesho asaxaabta la joogta, hadalka uu isticmaalo ama labiska uu xiranyahay.
- Leeyahay maqnaansho badan oo iskuulka ah, ku adkaanta inuu diiradda saaro waxbarashada ama uu la tacaalayo caqabado kale oo la xiriira iskuulka.
- Galay dambi ama uu leeyahay saaxiibo dambi galay.
- Isticmaalay tubaako/maandooriye/khamri ama uu leeyahay saaxiibo intaas isticmaasho.
- Ku dhacaayo muranno iyo dagaalo badan.
- Aan lahayn hawlo firaaqeed oo wanaagsan ama dhiirrigeliya.

"Qorshe ayaa caddeeya cidda qabanaysa shaqo kasta!"

Intani waa inta SSPF idiin qaban karto

SSPF waxay idinla diyaarin kartaa qorshe cad oo aan ku caawin karno sida:

- Taageero idinku socota ka waalidiin ahaan. Tusaale ahaan wada-hadallo ku saabsan xeerarka, dejinta xuduudaha ama koorsooyin aad ka qayb gali karto.
- Taageero u gaar ah adiga da'yarka ah.
- Tallaabooyin lagu qaadayo gudaha iskuulka si loo hagaajiyo waxbarashada.
- Helidda hawlo waanagsan oo waqtiyada firaaqada ah oo da'yarku daneynaayo.
- Caawimaad ku saabsan in laga fogaado tubaakada/maandooriyaha/khamriga iyo dembiyada.

- Marka aan wada shaqaynayno waxaan si kasii fiican u arki karnaa waxa uu da'yarku u baahan yahay.

"Mararka qaarkood waxaa dhici karta in kulamo badan noqdaan kulamada lala yeesho hay'adaha kala duwan, balse SSPF waxay ina wada kulmineysaa annaga oo dhan!"

Xiriir

iimayl: SSPF@vanersborg.se

Melissa Beganovic
Isku-duwaha SSPF
Tal: 0521 - 72 14 75
iimayl: melissa.beganovic@vanersborg.se

Waxaa horay loogu sameeyay da'yarkayga qorsheyaal. Maxay SSPF ka bedeli kartaa?

Waxaa jira dad waaweyn oo badan oo la kulma ilmahaga ama da'yarkaaga maalin walba. Taasi waxay ka dhici kartaa iskuulka, xarunta hawlaha xilliyada firaaqada ama bannaanka waqtiyada fiidkii. Iyadoo la adeegsanayo SSPF, dadka waaweyn waxay u wada shaqeeyaan si ka dhow intii caadiga ahayd. Shaqadu sidoo kale way u dhaqso badan tahay sababta SSPF awgeed, waxayna sidoo kale yareyn kartaa tirada kulamada ay qoyska uu ka qayb galo. Marka dad badan si wadajir ah u shaqeeyaan, fursadda uu da'yarku ku wanaagsanaan karo way sii kordheysaa.

Maxaa looga baahan yahay inaan saxiixo foomka?

Markaad saxiixdo foomka, hay'aduhu waxay ka hadli karaan macluumaad muhiim ah oo fududeynaya in la sameeyo qorshe wadajir ah. Haddii kale waxaa jirta xog-xejin ama sir-xejin taasoo ka hortagaysa in hay'aduhu wadaagaan macluumaadka ku saabsan shaqsiga gaarka ah.

Maxaa boolisku qayb ugu yahay?

Boolisku waxaa laga yaabaa inay kula kulmaan da'yarkaaga dibadda. Shaqada booliska waa inay ka yareeyaan bulshada dambiyada korna u qaadaan amniga. Marka boolisku wax badan ka ogaadaan da'yarkaaga, waxay awood u yeelanayaan inay si dhow ula socdaan oo si fudud u caawiyaan da'yarkaaga.

Adiga ka shaqeeya degmada Vänersborg

Waaxda Daryeelka Qofka iyo Qoyska ee Vänersborg ayaa mas'uul ka ah isku-duwidda shaqada SSPF. Adiga ka shaqeeya dhallinyarada una baahan taageero la xariirta shaqadaada, waxaad la xiriiri kartaa: SSPF@vanersborg.se ama wakiilkaaga SSPF.

Macluumaad ku qoran luqado kale

Här kommer länkar till information på arabiska, somaliska och engelska att publiceras inom kort

Macluumaad la xiriira

- Kontakt Individ- och familjeomsorg - SSPF - Skola, Socialtjänst, Polis och Fritid i samverkan